



**WAAXDA ADEEGYADA KOBOCA
QAYBTA OTISMKA
1000 Washington Street | Boston, MA 02118**

FARRIIN KU SOCOTO QOYSASKA LEH ILMAHA QABO OTISMKA

**Farriin Muhiim ah oo ku Socoto Qoysaska Massachusetts
ee Qabaan Ciyaalka Da'dooda Ka Yar tahay 10 Sano
ee Lagu Sheegay Xanuunada Nooca Otismka
Xiliga Codsiga uu Furan Yahay Oktoobar 18, 2024 ilaa Noofambar 1, 2024**

Qaybta Otismka ee Waaxda Adeegyada Koboca (DDS) ayaa maamushaa Barnaamijka Caawinta Ilmaha Otismka Qabo taasoo hawlo ka dhexgal ah samayso oo ka caawiyo ilmaha otismka qabo oo muujiyo caqabado daran ee dabeecadeed, bulshadeed iyo isgaarsiineed iyadoo lagu fulinaayo adeeg loo yaqaano **Awood Siinta La Ballaariyey, iyo Waxbarashada** (adeegyo iyo taageero tiro badan ee guriga dhexdiisa). Adeegan wuxuu ka dhici doonaa guriga cunuga mise goobo kale dabiici ah iyadoo uu kormeero ka yahay shaqaale daawayn ee tababaran waxaana la heli karaa ilaa saddex sano ee isujir ah. Barnaamijkan ayaa sidoo kale bixiyo adeegyo taageero ee la xiriiro sida hawlaha dhexgalka bulshadda, tababarka qoyska, iyo nasashada. Markii lasoo afjaro saddexda sano ee adeegyada tirada badan, cunuga ayaa awoodaa inuu helo adeegyo kordhin ah ee buuxinaayo baahiyada ilmaha oo na uga kaalmayn doono inuu la qabsado ka bixidda qaybta hawsha tirada badan ee caawinta ee Barnaamijka Caawinta Ilmaha Otismka Qabo ilaa sanad guuraha dhaladhada 10aad ee cunugaasi.

U qalmitaanka: Shuruuda xigta ayaa loga baahan yahay ka qayb qaadashada barnaamijkan caawinta:

1. Cunuga waa inuu leeyahay **xanuun lagu xaqiijiyay** ee Xanuunka Noocyada Otismka, taasoo ku xiran xaqiijinta ay samaynayso Waaxda Adeegyada Koboceed.
2. Cunuga waa inuu gaarin sanad guuraha dhalashada 10aad. Ilmaha markay dhashaan ilaa sanadkooda 9aad way ka qayb gali karaan.
3. Cunuga waa inuu yahay cunug deggan Massachusetts.
4. Cunuga waa inuu fulinaayo heerka adeega caafimaad ee loga baahan yahay adeegyada lagu qabanaayo Xaruunta Adeeg Bixinta Dhexe ee logu talagalay dadka leh Laxaad La'aanta Garaadka (ICF/ID) sida ay ku qiimeysay WAAXDA ADEEGYADA KOBOCEED.
5. Qoyska inay doortaan inuu cunuga ku qaato adeegyada guriga iyo bulshadda.
6. Cunuga waa in si nabadgeliyo leh logu adeegi karo bulshadda dhexdeeda.
7. Cunuga waa inuu leeyahay qof sharciyan masuul ka ah oo maamuli karo adeegyada iyo caawinaadda barnaamijka.
8. Cunuga waa inay wakaaladda MassHealth u qiimeyso inuu u qalmo caymiska Guud ee MassHealth, markii lagu saleeyo dakhliga qoyska. **Markii la eego qoysaska oon wali codsi u samaynin MassHealth, tani waa qasab in la sameeyo goorta la buuxinaayo Foomka Codsiga Barnaamijka Furan ee Caawinta Ilmaha Otismka Qabo.** (Tilmaanta ku saabsan habka codsiga logu sameeyo MassHealth ayaa ku yaalaan bogga xiga)

Dhammaan adeegyada ayaa uga baahan inuu cunuga weli buuxiyo shuruudaha u qalmitaanka lacageed iyo xanuuneed ee Barnaamijka Caawinta Ilmaha Otismka Qabo inta ay ka diiwan geshan yihiin barnaamijka.

Barnaamijka Caawinta Ilmaha Otismka Qabo ayaa sii wadi doono inuu u adeego ilmaha qabo xanuunada nooca otismka oo fulinaayo shuruuda u qalmitaanka Barnaamijka, ilaa intay ka gaarayaan sanad guuraha dhalashada 10aad. Xiligan hadda la joogo barnaamijka ayaa u adeegi karaa qiyaas ahaan ilaa 500 oo arday sanad walba. Barnaamijka Caawinta Ilmaha Otismka Qabo ayaa ilaaliyaa qiyaas gaar ah (45 boos ee gobolka dhan) ee ciyaalka da'da 3da sanno iyo ka baxaayo ka Dhexgalitaanka Xiliga Hore. Waxaa jiraa heer sare ee dad ka baxo barnaamijka sanad walbo, sidaa darteedana, waxaanu kaga buuxinnaa boosaska bannaan liiskan Codsiga Furan. Qaybta Otismka ayaa fursad ka bixinaysaa codsiga hadda socdo iyadoo lasoo marinaayo mudada codsiga furan. Qaybta Otismka ayaa qabatay codsiga furan ugu dambeysay Oktoobar 2023.

Xiliga Codsiga Furan ee 2024 wuxuu socdaa ka bilaabato **Oktoobar 18, 2024 ilaa Noofambar 1, 2024**. Fadlan hubi inaad BOOSTADA mise IIMAYLKA ku dirto **Codsiga Xiliga Codsiga Furan** inta u dhexeysa Oktoobar 16ka iyo Oktoobar 31da. Qaybta Otismka ayaa tuuri doonto gudbinada lagu sameeyey xiligan xili ka baxsan. Haddaad gudbisay codsi inta lagu jiray Codsiga Xiliga Codsiga Furan ee la soo dhaafay ee Oktoobar 2023, WAA QASAB INAAD DIB USOO GUDBISO CODSI CUSUB SANADKA 2024.

Habka looga Qayb Galo Geedi Socodka Codsiga Furan:

1. Raadi koobiga Codsiga Xiliga Codsiga Furan

- Fadlan la xiriiir Xaruunta kuugu dhaw ee Caawinta Otismka (ee ku lifaaqsan) sifo aad ugu samayso codsi **Codsiga Xiliga Codsiga Furan**.
- Xaruumaha Caawinta Otismka ayaa kuu furan sifo ay kaaga caawiyaan buuxinta codsiga.
- Dhammaan foomamka ayaa sidoo kale lagu daabaca bogga internetka DDS www.mass.gov/DDS iyagoo ku hoos jira "Adeegyada Caawinta Otismka ee DDS"

2. Buuxi Codsiga Xiliga Codsiga Furan. Waxaad u baahan doontaa:

- taarikhda dhalashada cunugaada
- lambarka badqabka bulshadeed ee cunugaada
- lambarka aqoonsiga cunugaada ee MassHealth

3. Gudbi Codsiga Xiliga Codsiga Furan:

- Codsiyaalka waa inay leeyihiin Calaamadda boostada mise Shaambada Taarikhda leh ee u dhexeysa **Oktoobar 18, 2024 ilaa Noofambar 1, 2024**.
- Codsiyaalka la helo xiligan xili ka baxsan waa la tuuri doonaa.
- Ku buuxi codsiga qalin si fiican oo loo arki karo na u qor.
- Ku saxiix codsiga qalin.
- HAL CODSI OO KELI U SAMEE CUNUG WALBA—Qaybta Otismka way tuuri doonaan codsiyaalka hal ka badan

4. Qaybta Otismka MA OGOLA codsiyaalka gacanta lagu gudbiyay, codsiyaalka waa in boostada lagu soo diro:

Department of Developmental Services

Autism Division

Attn: Children's Autism Waiver Program Open Request

1000 Washington Street, Boston, MA 02118

Waa arrin mudnaan ee Qaybta Otismka ee DDS inay xaqiijiyaan in geedi socodka lagu codsanaayo ka qayb galka Barnaamijka Caawinta Ilmaha Otismka Qabo ay si buuxdo u heli karaan qoysaska iyo ilmaha otismka qabo oo weliba ka soo jeedo asal luuqadeed iyo dhaqammeed ee gaarka. Qoraalada ayaa lagu heli karaa Afcarabiga, Burmese, Afjayska (Mandarin & Cantonese), Haitian Creole, Cape Verdean Creole, Portuguese (Yurub), Isbaanishka, Khmer, Vietnamese, Nepali iyo Afsoomaali

Fasiraada iyo Turjubaanka ayee dhammaan ka qayb galeyaalka ku heli karaan bilaash.

Habka Codsiga lagu Sameeyo MassHealth: Waxaad codsi ugu samayn kartaa MassHealth mid ka mid ah siyaabaha xiga:

- Haddii aad akoon leedahay, soo gal mahealthconnector.org soo na codso MassHealth
- Haddii aad akoon lahayn, habka ugu dhaqsaha badan ee online-ka lagu codsado oo na lagu abaabulo akoon ilaashan ee online ah waa mahealthconnector.org.
- Buuxi oo na saxiix the [Codsiga Massachusetts ee Caymiska Caafimaadka Guud iyo Caafimaadka Ilkaha iyo Caawinta Xagga Kharash Bixinta](#)
Ka dib na boostada ugu dir:

Health Insurance Processing Center

P.O. Box 4405

Taunton, MA 02780

mise Fakis ugu dir 1-857-323-8300

- Soo wac Xaruunta Adeega Macaamilka ee Xubnaha MassHealth halkan 1-800-841-2900 (TTY: 1-800- 497-4648 ee logu talagalay dadka Dhagoolka, maqalka ku adag, mise laxaad la'aanta hadalka) mise 1-877-MA ENROLL (877-623-6765).
- Booqo mid ka mid ah 4ta Xaruumaha Diiwan Gelinta MassHealth (MEC) ee hoosta ku liis gareysan iyo codsi ugu samee shakhsiyan.

MassHealth Enrollment Center – Chelsea

45 Spruce Street Chelsea, MA 02150
#1-800-841-2900 TTY 1-888-665-9997

MassHealth Enrollment Center-Springfield

88 Industry Avenue, Suite D Springfield, MA 01104
#1-800-841-2900 TTY 1-888-665-99

MassHealth Enrollment Center – Tewksbury

367 East Street Tewksbury, MA 01876
#1-800-841-2900 TTY 1-888-665-9997

MassHealth Enrollment Center- Taunton

21 Spring Street, Suite 4 Taunton, MA 02780
#1-800-841-2900 TTY 1-888-665-9997

Sifo aad u hesho maclumaad dheeraad ee ku saabsan Barnaamijka Caawinta Otismka, la xirii Xaruuntaada kugu dhaw ee Caawinta Otismka hoosta ku taalo mise iimayl u dir AutismDivision@mass.gov. Mise wac Qaybta Otismka ee DDS lambarkan 617-624-7778.

Western Massachusetts**Pathlight: Autism Connections**

220 Brookdale Drive
Springfield MA 01104 | 413-732-0531

Norfolk County**Lifeworks: The Family Autism Center**

789 Clapboardtree Street
Westwood, MA 02090 | 781-762-4001

Central Massachusetts**HMEA: Autism Resource Central**

712 Plantation Street
Worcester, MA 01605 | 508-835-4278

Southeastern Massachusetts**Community Autism Resources (CAR)**

40-A Dean St,
Taunton, MA 02780 | 508-379-0371

Metro West of Boston**Autism Alliance of MetroWest (AAMW)**

1881 Worcester Rd, # 100A
Framingham, MA 01701 | 508-652-9900

Northeastern Massachusetts**Northeast ARC (NEARC) The Autism Support Center**

100 Independence Way-Suite D3
Danvers, MA 01923 | 978-777-9135

Greater Boston**Vinfen**

1208A VFW Parkway
West Roxbury, MA 02132 | 617-206-5038

www.mass.gov/DDS-autism-waiver-services

Maclumaadka ayaa sidoo kale lagu heli karaa luuqadaha xiga:

Afcarabiga, Burmese, Afjayniska (Mandarin & Cantonese), Haitian Creole, Cape Verdean Creole, Portuguese (Yurubeed), Isbaanishka, Khmer, Vietnamese, Nepali iyo Afsoomaaliga